



SEIU Local 26 Janitorial Bargaining Final Update #13

Guul Heshiis oo taariikh leh, dhexna maray Shaqaalaha nadaafada iyo ganacsatada.

Sabtidii Marso 7da, 4 bilood kadib gorgortankii socdey, wuxuu ku soo dhamaadey heshiis (la'ansixidoono) oo dhex marey gudidda gorgortanka iyo ganacsatada, kaas oo keenay musharah kordhintii ugu badneyd taariikhda Localka. Heshiiskan waxa la gaadhay 7dii subaxnimo kadib markuu gorgortanku socdey 22 sacadood oo loo soo jeeday habeenkii oo dhan. Boqolaal shaqaale ayaa soo dhameystay shaqadoodii kadibna oo imaadey, si ay u muujiyaan awooda shaqaalaha, iyada oo ay soo socotay shaqo joojintii dheerayd Isniinta, maalintaasna ay ku beegnayd xiligii loo qabtey. Waxa awoodeena muujiyay shaqo joojintii aan halka maalin sameynay Febaraayo 27dii. Shaqo joojintaa ka hor ganacsadayaashu wax ay noo ogalaayeen majirto, kaliya waxey rabeen inay nasiyaan \$1.40 afar sano loo qeybinayo. Shaqo joojinta kadib waxey ogalaadeen:

<p>Mushahar korin badan sanad walba</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Shaaqalah fulltimeka ah: 75 cents, 45 cents, 52 cents, 48 cents oo noqoneysa \$2.20 heshiis 4sano soconaya (kii hore wuxuu ahaa shaqalaha fulltimeka \$1.80!) • Shaqaalaha Part timeka ah ee ka shaqeeya dhismayaasha waaweyn (250,000 Sq ft) waxey helayaan in la mid ah shaqaalaha fulltimeka ah \$2.20. Kuwa dhismayaasha yar yar ka shaqeeya (ee ah 75,000 -249,000sq ft) waxey helayaan % (barsentaje) la mid ah shaqaalaha fulltimeka ah. Shaqaalaha part timeka ah ee ka shaqeeya dhismayaasha (ka yar 75,000 sq ft) ee degan magaalooyinka Minneapolis iyo St. Paul waxey gaadhidoonaan \$15.50 markuu heshiis kani dhamaado (waxaa u kordhidoona \$3.11) Magaalooyinka kalena waxay qaadan doonaan \$14.10 (waxaa u kordheysa \$3.00 markuu dhamaado heshiiskan) • Shaqaalaha nadeefiya garoonka ciyaaraha mushaharkoodu hadda ah \$11.12 wuxuu noqon \$16.00 waxaa \$4.00 oo dheeraad ah markuu heshiiskan dhamaado.
<p>Maalmaha jirada oo la kordhiyay:</p>	<p>Ka bilaabanto Janaayo, shaqaalaha fulltimeka ah <u>oo dhan</u> oo 5 sano iyo wixii ka badan joogey waxey helayaan 6 maalmood oo jiro ah. Tanaaba ka fiican sharcigaan 2 sano ka badan u dagaalamayney, waayo waxaa lagu daray shaqaalaha ka shaqeeya magaalooyinka ka baxsan magaalooyinka-mataanaha. Shaqaalaha kale ee aan 5 sano wali gaadhin ee fulltimeka shaqeeya waxey helayaan 2 maalmood oo jiro ah.</p>
<p>Nadaafadda dabiiciga:</p>	<p>Waxaan ku guuleysaney inaan waxbarasho lacag meel loo dhigo, lagana hadlo dhibaatooyinka shaqaalah sida nabad galyada, qalabka suntan ah ee wax lagu nadiifiyo, in la ilaaliyo korontada iyo biyaha. Waxaana intaa qabandoona gudidda maamulka ee shaqaalaha.</p>
<p>Culeyska Shaqada:</p>	<p>Shaaqalaha aaminsan in shaqada lagu badiyay waxay codsan karaan in lala qiimeeyo shaqada oo loo soo diro qof Steward ah. La soco markii hore 1 baa la ogalaa lakiin hada 2 ayaa naloo ogalaadey.</p>

Xad gudubka:	Waa markii ugu horeysay ee aan ku guuleysatay hab qoraal ah oo heshiiskeenana lagu daray, ganacsatadu waxey la shaqeyn doonaan Unionka si looga hortago xad gudubka noocuu doono ha ahaadee. Xad gudub af, mid gacan, mid lagu dabo galayo iyo mid dhaqanxumo ahba. Waana iney usheegan shaqaalaha sharciyadooda ka hadlaaya xad gudubka.
Fasaxa oo la sii wanaajiyay:	Shaqaaluhu wuxuu helayaa fasaxooda Janaayo 1da, wuxuuna helayaan maalmahay xaq u leeyihiin, wax u uruurayaa ma jiraan hadda ka dib. Tusaale: Sanadadii kore (shaqalaha joogay 4 sano ee bil gafay shaqadiisa wuxuu xaq u leeyahay 2 usbuuc oo fasax ah, xaguu ka qaadan lahaa 72.92). Hada wixii ka dambeeya waa inaad goraal ku codsayaa fasaxaaga, qoraalna laguugu soo jawaaba.
Caymiska caafimaadka:	Waxaa hoos loo dhigay lacagtuu bixin jirey qofka kaligiis, oo hadda bixin doona \$40/bishii, iyo \$150/bishii oo ah qofka iyo caruurutiisa, wax 8% ka badana in aaney ku kordhin mustaqbalka.
Darajada kala horeysiinta:	12 bilood ayaad ku jiri kartaa listadda shaqaalaha ay shaqdu ka dhamaatay inta aanad xaqas lumin. (Markii horena waxay ahyd 6 bilood)
Saxitaanka Mushaharkaaga:	5 maalmood gudahood waa in lagu saxo haddi mushaharkaaga lagaa qaldo. (Meeshaad ka sugi layh jeegaaga dambe) iyo cadii rabta (direct deposit) in lagu shubo lacagtooda bangigga.
Unionka Tababarkeeda:	Waxaa la tusi doonaa shaqaalaha cusub fidiyo si ay ogadaan xaqooda.
Maalinta Sanadka Cusub ka horeysa:	Shaqaala in loo dabacsanaado haduu rabo inuu maalintaa 4 saacadood ka hor ka baxo shaqada.

Talaabada hada la qaadayo ayaa ah in Shaqaalaha oo dhan ay ansaxiyi heshiiskan. Mushahar kordhito waxaad arki doontaa marka heshiiskan la ansaxiyo jeegaaga ku xigga.

Next Steps:

Shirka Codeynta Ururka ee lagu ansaxinayo heshiiska. Sabtida Marso 14da.

Goobtu waa: Hallka Local 26 (Ciiwaanka). Saacaduna waa:

@12pm 826 18th Ave NE, Minneapolis NE

